




ismaamulka san diego



**waad ku mahadsan  
tahay samaynta  
qaybtaada si**

**loo ilaaliyo  
marinadeena biyaha**



20DISEEMBAR2016

# BMP-yada dhulka beeran

**Maamulka ugu fiican ee Nidaamka Dhismaha Biyaha Daadka (BMPs) ayaa lagu rakibaa dhismeyaasha qaar oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan kahortaga maadooyinka wasaqda ah sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnda biyaha daadka roobka kadibna galaaya baliyadda, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah boqolaalka ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal BMP.**

## **BMP-yadda Waxay Nadiifiyaan Marinnda Biyaheena**

BMP-yadaada waxaa loo sameeyay inay maadooyinka wasaqda ah ka saaraan biyaha roobka ee kasoo dareera dhismahaaga ilaa heerka u sareeya ee suuragalka ah. Marka aad tahay mulkiilaha mid kamid dhismeyaashaan, sharchiyada Ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad **samayso kormeero joogto ah iyo talaabooyinka dayactirka** si loo xaqijiyo in BMP-yadaadu ay si sax ah u shaqaynayaan.



**Diiwaanadeena ayaa muujinaaya inaad haysato ugu yaraan BMP-ka dhulka beeran ee dhismahaaga.** BMP-yada dhulka beeran waxaa ku jira geedaha ku teedsan aaga, nagaarka difaaca ah, iyo kanaallada geedaha lagu beeray. Si ay kaaga caawiso joogtaynta BMP-gaan **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee ismaamulka San Diego** ayaa ku siinaaya buugaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto BMP-yada iyo sida aad u joogtaynayo.

## **Sida BMP-kaaga Geedaha lagu beeray U shaqeeyo**

BMP-yada dhulka beeran ayaa miira biyaha daadka ayagoo adeegsanaaya nidaamyada noolaha ee ku jira bii'ada. Waxay adeegsadaan geedo (badanaa nagaar iyo caws kaladuwani) iyo ciid si ay wasaqda uga saaraan daadka biyaha roobka. Caadiyan kadib marka roob culus da'o, daadka ku aruura aaga BMP-ga ayaa si dartiib ah ugu miirma ciida, taasoo yaraynaysa cadadka daadka iyo

xog dheeraad ah > > >

# BMP-yada dhulka beeran

wasaqda galaysa marinka biyaha daadka ee deegaanka. Geedaha lagu beero BMP-ga ayaa ka hortaga ciid xaarka, sidoo kalena qayb ka qaata bixinta qashinka ayagoo dhuuqaaya qashinka ciidu qabatay. BMP-yada dhulka beeran ayaa laga heli karaa aagaga dhulka geedaha gaagaaban, ama dusha bokisyada geedaha lagu beero.

## *Hel oo Hayso BMP-gaaga*



Si aad u hesho BMP-gaaga, raadi aagaga dhulka beeran ee biyuhu ku aruuraan kadib roobka. Waxaa jiri kara duleelka biyaha daadka oo ku yaala dhexda aaga ayadoo ku xiran nooca BMP-ga dhulka la beeray.

Marka aad hesho BMP-gaaga Geedaha lagu beeray, waa muhiim inaad joogtayso. Ku haynta BMP-ga Geedaha lagu beeray xaalad shaqaynaysa ayaa kaa caawinaysa inaan ilaalino nadaafada marinada biyaha ee deegaankeena. Hoos waxaad ka helaysaa dhawr shaqooyinka dayactirka ah si aad u samayso:

- **Ka saar qashinka ama wasaqda aruurtay ee xiraysa qulqulka biyaha aagaga geedaha lagu beeray ama aaga nagaarka difaaca ah.**
- **Haddii loo baahdo, wax ka badal heerarka BMP-gaaga si loo hubiyo in biyuhu ku maraan si sax ah.**
- **Yar geedo kasta oo xad dhaaf u baxa (heer aan ka badnayn jooga naqshadii hore).**
- **Ka saar qaruuraxa ku aruura ee ka qoto dheer 2 inji, iyo waxyaabaha ku aruuray ee daboolaaya geedaha.**
- **Ha xanibin jarjarka xakabada ama haka leexin biyaha BMP-ga.**
- **Haddii aan geedo ku beernayn meesha, dib u beer BMP-ga.**
- **Ku xir nidaamka ku haboon ee tartiibinta (ama qaab dhismeed kale oo xawliga dhimaaya) meesha daadku ka galaayo BMP-ga.**

Si aad u hesho liiska shaqooyinka kale, ka fiiri foomka xaqijinta dayactirka ama qorsheyaasha dayactirka ee ka yimaada ee shirkada dhistay gurigaaga.

Sanad kasta Barnaamijka Difaacaha Waraha Biyaha ayaa kuusoo diraaya foomka xaqijinta dayactirka si aad u buuxiso, u saxiixdo, aadna ugu celiso Ismaamulka. Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in la xaqijiyo in dayactirka muhiimka ah lagu sameeyay BMP gaaga.

Ku fashilmida samaynta dayactirka BMP-yadaada ayaa dhalin karta fulinta baaritaan ama kormeerka dabagalka ah.

### ***Haddii aad qabto su'aalo, Nagalasoo Xariir:***

### **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha**

**1-858-495-5323**

BMP.Program@sdcountry.ca.gov

<http://www.sandiegocounty.gov/stormwater>

